



SABABTA KA QAYB QAADASHADA IMTIXAANKA GOBOLKU MUHIIMKA UGU YAHAY SIYAASAD DEJIYAYAYAASHA

Sidee Bay Qaadashada Imtixaanaadka Gobolku U Caawiyaan Ardayda iyo Qoysaskooga ku nool Oregon?

- Waxay qoysaska iyo xubnaha ka tirsan bulshada ka caawisaa fahamka sida dugsiyada degaanku u taageerayaan baahiyaha ardayda oo dhan ee barashada xirfadda luqadda Ingiriisiga (ELA), xisaabta, iyo heerarka sayniska.
- Waxaa lagu qiyaasaa horumarka ardayda ee ku aadan dhammeysashada dugsiya sare iyo guusha dugsiya sare ka dib, sida aadista kulliyad iyo in diyaar ay u yihiin xirfad shaqo.
- Waxay qiyaastaa oo bixisaa macluumaad la qaban karo oo ku aadan hoggaamiyayaasha waxbarashada oo ku saabsan barashada ardayga ee ELA, xisaabta, iyo Heerarka sayniska dhexdooda iyo ka filista in ay aqoon u leeyihiin.

Sidee Bay Qaadashada Imtixaanaadka Gobolku U Caawiyaan Degmooyinka iyo Dugsiyada?

- Wuxuu taageeraa horumarinta siyaasado iyo hab lagu dhaqmo oo loo siman yahay, iyo qaybinta ilaha.

Su'aalaha Inta Badan La Iska weyddiyo oo ku saabsan Imtixaanaadka Gobolka

Ardayda oo dhan miyaa looga baahan yahay in ay ka qayb qaataan imtixaanaadka gobolka?

Xeerka Arday Kastaa In Uu Guulaysto 'Every Student Succeeds Act' **wuxuu farayaa** ka qayb qaadashada dhammaan ardayda ee heerarka fasal ee la iskaga baahan yahay ee imtixaanaadka gobolka (marka laga reebo faahfaahinta ku qoran [ORS 329.479](#) iyo [OAR 581-021-0009](#)). Ardayda qabta naafanimada, ka qayb qaadashada imtixaanka waa mid sidoo kale uu u baahan yahay Xeerka Waxbarashada Dadka Naafada ah (IDEA).

Imtixaanaadka gobolku miyay yihiin kuwa ay heli karaan ardayda oo dhan?

Inta badan ardaydu waxay qaataan imtixaanka gobolka ee guud. Qaar baa u baahan qorshayaal la sii dejiyay si ay u galaan imtixaanka, iyada oo kuwo yar oo ka mid ah oo qaba naafanimada dhanka garashada ah oo la taaban karo ay qaataan qiimeyn beddel ah.

- Waxay muujinaysaa kala duwanaanshaha waxqabadka ee kooxaha ardayda oo kala duwan ee Oregon iyada oo barnaamijyada taageeraduna ay tahay in ay wax ka qabtaan baahiyaha waxbarasho ee ardaydaasi.

Sidee Baan U Taageeri Karaa Barayaasha, Ardayda iyo Qoysaska ku nool Oregon?

- Natiijooyinka imtixaanka gobolka waxaa loogu talagalay in ay noqdaan kuwo lagu kalsoonaan karo oo gaarsiisan heerka kooxda arday ahaaneed, maaha kuwo gaarsiisan heerka arday gaar ah. Qiimeynta ardayga gaar ahaaneed, helitaanka fursado waxbarasho (sida dariiqooyinka koorso oo degdeg ah, Meelaynta Horumarsan, Shahaadada Caalamiga ah, ama barnaamijyada dadka Xirfadda iyo Hibada leh) waa in ay noqdaan kuwo ku saleysan **ilo badan oo caddeyn ah.**
- Xoojinta in **tayada dugsigu ay ka badan tahay wadarta natiijooyinka imtixaankeeda marka la eego dhowr maado oo muhiim ah.** Kala saarida ama go'aaminta degmooyinka ama dugsiyada ee kaliya lagu saleynayo waxqabadka dhanka imtixaanka gobolku wuxuu dhiirigeliyaa go'aan gaaris sii wada sinnaan la'aanta.
- Dhiirigelinta isticmaalka natiijooyinka imtixaanka gobolka ee wada hadalada ku saabsan warbarashada ardayga. Wada hadaladani waa in ay ku saleysnaadaan tayo kuna dhisnaadaan karti.

Imtixaanaadka gobolku waxay qiyaasaan horumarka ardayga ee dhanka Xirfadda Luqadda Ingiriisiga, Xisaabta, iyo Sayniska. Waa in la tarjumaa iyada oo lagu darayo ilo kale oo caddeyn ah, sida natiijooyinka Ra'yi Ururinta SEED, natiijooyinka Ra'yi ururinta, natiijooyinka qiimeynta ku meel gaarka ah, jawaab celinta macallinka, kaararka warbixinta, iyo imaanshaha.

Imtixaanaadka gobolku waa qayb ka mid ah nidaamka waxbarasho oo dhammeystiran. Nidaamka qiimeynta dheelitiran ee Oregon ayaa bixiya ilo dheeraad ah si loo taageero waxbarida iyo waxbarashada inta lagu jiro dugsiga maalintii iyo sanadka oo dhan.

LA XIRIIR



[Bogga Internet-ka ee Kooxda Qiimeynta ODE](#)

Fadlan wixii su'aalo ah, faallooyin ah, ama talooyinka u soo dir:

ODE.AssessmentTeam@ode.oregon.gov



Xarunta Qaranka ee Natiijooyinka Waxbarasho
www.nceo.info

NCEO waxaa lagu taageeraa heshiis iskaashi (H326G160001) oo ka dhexeeya University of Minnesota, Xarunta Qaranka ee Natiijooyinka Waxbarasho (NCEO) (#H326G160001) iyo Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka, Xafiiska Waxbarashada Gaarka ah iyo Adeegyada Baxnaaninta (OSERS), Xafiiska Barnaamijyada Waxbarashada Gaarka ah. Waxyaabahani kama turjumayaan mowqifka ama siyaasadda Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka ama Xafiisyada ku dhex yaal. Mas'ulka Mashruuca David Egnor